**Dhambaalka Kormeeraha Guud - Ku-noqoshada Dugsiga Degmada ee Qoysaska CCS**
**8/18/25**
**FINAL (UGU DAMBEYN)**

Mar-labaad ku soo Dhawaada Ku sooo Laabashada, Qoysaska ee Dugsiyada Magaalada Columbus!

Agoosto walba waxay u-keentaa Dugsiyada Magaalada Columbus cutub ku cusub, sanadkanna, waxaa jira wax badan oo aan sugayno!

Marka hore, Waxaan jeclaan lahaa inaan u mahadceliyo qof kasta oo nagula soo biiray Ban-dhigga Khayraadka Dib-ugu-noqoshada Sannadlaha ah ee Sannad-dugsiyeefkeena 4-aad ee Sabtidii, 16-kii-Agoosto, ee Fort Hayes. Waxa ay ahayd mid cajiib ah in lala xiiro qoysas badan iyo dareen farxadeed oo aad la wadaagto guusha sanadka soo socda!

Markaan soo dhawaynayno ardaydeena sanad-dugsiyeedka cusub, waxaan xasuustay kartida aan dhammaadka lahayn ee ku jirta mid kasta oo ardaydeena ah. Mawduuceena sanadkan, 'Hogaamiyeyaasha halkan ku koray,' waxa ay u dabaal-degayaan awooddaas! Waxaan ku kalsoonahay in ardaydeenu ay leeyihiin karti ay wax ku hogaamin karaan, waxaana sanadkan u qorshaysan in aan kobcino riyooyinkooda, xoojinta xirfadahooda hoggaamineed, una diyaarino inay si kalsooni leh ugu tallaabsadaan hoggaamiyeyaasha la rabo inay noqdaan

Si loo hubiyo in sanadka si habsami leh u bilaabmay, Waxaan jeclaan lahaa inaan lawadaago ilo waxtar leh iyo dhawr xasuusin si aan u hubiyo in qoyskaagu u diyaar garoobay bilow xoogan:

- **Ku-laabashada-Xarunta Dugsiga (Hub):** Booqo Xarunteena Dib-ugu laabashada-Dugsiga ee Hub (Back-to-School Hub) si aad si deg-degg ah u hesho wax kasta oo aad u baahan tahay sanadka soo socda, laga bilaabo liiska sahayda dugsiga ilaa jadwalka dugsiga, faahfaahinta diiwaan-gelinta, iyo wax ka badan
- **Xoggta Jidka Baska:** Qoysaska leh ardayda u qalanta gaadiidka waxay heli karaan faahfaahinta jidka baska iyada oo loo sii marayo Bogga Xiriirka Waalidka (Parent Portal) ee hoos yimaada batoonka (taabka) Gaadiidka. Fadlan hubi inaad si joogto ah u hubiso wixii ku soo kordha.

- **Bogga Xiriirka Ardayga:** Bogga Xiriirka Ardayga (The Student Portal) waa hoyga dhiji-taalka ilmahaaga ee fasallada, jadwallada, iyo agabka waxbarasho, oo ka caawinaya in ay si abaabulan u-hawl galaan.
- **Hagaha Guusha Ardayga:** Hagaha Guusha Ardayga 2025-2026 (The 2025–2026 Guide to Student Success) hadda waa la heli karaa. Wuxuuna qeexayaa siyaasadaha iyo waxyaabaha laga filayo ee hubinaya in dugsiyadeenu ay ahaanayaan kuwo ammaan ah, loona wada dhan yahay, oo xoogga la saarayo dhanka tacliinta. Hage kasta gudihiisa waxaa ku jira foomamka, siyaasadaha muhiimka ah, iyo xogo si looga caawiyo ilmahaagu inuu horumaro sanadka oo dhan.

Ka degmo ahaan, waanu kaala garab shaqayn doonaa dhan walba adiga iyo ilmahaaga tallaabo kasta oo jidka ah. Iskaashigeena aan kula leenahay ayaa fure u ah guusha arday kasta, waxaanan uga mahadcelineynaa kalsoonida aad nagu qabto. Waxaana nahay hal koox – marka dugsiyada iyo qoysasku ay wada shaqeeyaan, waxaan qaabeynaa hogaamiyayaasha hagi doona bulshadeena iyo mustaqbalkeena.

Waad ku mahadsan tahay inaad tahay lammaaneheena safarka waxbarasho ee ilmahaaga.

Aynu ka dhigno sannad-dugsiyeedkan mid kobcaya, guuleysta, iyo daqiiqado lama ilaawaan ah. Mar labaad ku soo dhawaada, oo aan tusno bulshada Columbus in Hogaamiyeyaashu ay halkan ku koreen Dugsiyada Magaalada Columbus!

Mahadsanidiin,



Dr. Angela Chapman
Kormeeraha /Agaasimaha Guud, Dugsiyada Magaalada Columbus